


Waxaan wadaagnaa hamiga Bloomington



Takooristu waa SHARCI DARO



Hadii aad dareensantahay in lagu takooray ama eexasho lagugu sameeyey wac Gudiga Xuquuqada Aadamiga Bloomington

Tel. 952-563-8733
(TTY: 952-563-8740)
Tel. Dadka dhagaha la'

Magaalada Bloomington, Minnesota

Magaalada Bloomington ma samayso takooris ay sabab u tahay naafanimada marka loo baahdo ogolaansho ama fursad lagu helayo daawayn, shaqaalayn, adeeg hawleed, mashaariic, ama waxqabadyada. Marka la codsado, kaalmo ayaa la siin doonaa si loogu ogolaado shaqsiyaadka naafada ah in ay ka qayb galaan dhamaan adeegyada, mashaariicda, iyo hawlaha magaalada Bloomington.

Marka la codsado, macluumaadkan waxaa la heli karaa iyagoo ah xarfaha taabashada lagu akhriyo, daabucid farwaawayn, cajaladaha maqalka, ama cajaladaha kumbiyuutarka

**Gudiga Xuquuqda
Aadamiga Bloomington
ayaa kaa caawin...**



Waxaan wadaagnaa hamiga Bloomington

Xuquuqda Aadamiga waxay saamaysaa Farxada, caafimaadka iyo barwaaqada bulshada. Ilaalinta xuquuqahan waa muhiim.

Laga soo bilaabo, 1968, Gudiga Xuquuqda Aadamiga Bloomington wuxuu la talin ku saabsan arimaha xuquuqda aadamiga siinayey Golaha maamulka Magaalada iyo Gudiga Iskuulada Bloomington. Gudigu wuxuu sidoo kale aqoonsaday xubnaha bulshada dadaalkooda fiican ee dhinacyada xuquuqda aadamiga.

Gudiga Xuquuqal Aadamiga Bloomington wuxuu u cadaynayaa DHAMAAN dadka ku nool Bloomington inay u siman yihiin fursadaha isla markaana xuquuqda u simanyihiin.

- Gudigu wuxuu dhexdhaxaadiyaa dadka ka cabanaya takoorista.
- Gudigu wuxuu tacliimiyaa una ololeeyaa arimaha xuquuqal aadamiga.

Waa sharci daro

in lagugu sameeyo takoor lidi kugu ah sida:

- Aargoosi
- In lagu diido adeega guud
- In lagu diido Gargaarka guud
- In lagu diido guriyeynta
- In lagu diido shaqaalaynta
- In lagu diido waxbarashada
- In lagu diido amaahda

In lagu gargaari waayo ama waxaadan raali ka ahayn lagugu qasbo.

Ka qaybqaado!

Sagaalka xubin ee Gudiga Xuquuqal Aadamiga waxay kulmaan Isniinta saddexaad ee bil walba saacadu markay tahay 5:30 galabnimo goobta ay ku kulmaana waa Bloomington Civic Plaza, 1800 West Old Shakopee Road. Dadwaynuhu wuxuu kugu dhiiri galinyaa inaad ka soo qayb gasho.

Waxaan doonaynaa inaad ka qaybqaadato. Soo wac 952-563-8733 (TTY: 952-563-8740), hadii aad jeceshahay inaad hesho nuqul ka mida ajandahanaga.

Marka la eego qodobka tirsigiisu yahay 363 ee sharciga Minnesota, waa sharci daro in lagugu sameeyo takoor sababtoo ah:

- Da'da
- Caqiidada
- Midabka
- Ku tiirsanaanta gargaarka dadwaynaha (qaadashada Cayrta)
- Naafanimo
- Darajada qoys-ahaaneed
- Darajada gudiga deegaanka
- Darajada guurka
- Wadanka aad ka soo jeedo
- Jinsiyada
- Diinta
- Dhadig ama lab kaa tahay
- Rabitaanka nooca galmada

Kooxdaada ma la hadli karaa?

Is fahanka wanaagsani wuxuu ku yimaadaa wada xidhiidh la horumariyey. Xubnaha Gudigu waxay heegan u yihiin inay kaala xaajoodaan su'aal kasta ama waxa aad tabanayso.